# ~ Ogeysiinta Asturnaanta HMIS ~

**Macluumaadkaaga iyo Xuquuqdaada**

---

Waxaan macluumaadka aan soo ururino ku keydinaa nidaam xoggeed oo sugan.

Waxaan macluumaadkaaga u isticmaalnaa in uu naga caawiyo in aan si wanaagsan u fahamno baahiyahaaga, u wadno barnaamijyada, u wanaajiyo adeegyada una buuxino shuruudaha dhaqaale bixinta. Waxaan soo ururinaa oo kaliya macluumaadka aan ugu baahanahay ujeedooyinkan.

Waxaan isticmaalnaa heerarka ammaanka ee ugu sarreeya si aan u ilaalino macluumaadka la geliyo nidaamka. Waxaan raacnaaa dhammaan sharciyada khuseeya.

Haddii aad noo oggolaato, waxaan macluumaadkaaga ka dhigi doonaa mid u muuqda dad gaar ah oo u shaqeeya hay’adaha aan la leenahay wada shaqeynta.
Waxaan wadaagnaa qaar ka mid ah macluumaadka ka tirsan nidaamka iyada oo aan la eegayn oggolaanshaha.

Waxaa dhici karta in aadan rabin in macluumaadkaagu u muuqdo hay’adaha kale ee ka tirsan nidaamka.  Haddii xaaladu sidan tahay, fadlan tani kala hadal xubin shaqaale ah.  Laguuma diidi doono adeegyada, haddii aad diido in aad la wadaagto xogta.

Waxaad xaq u leedahay in aad aragto diiwaankaaga iyo in aad codsato in aan saxno iyada.

*Fadlan nala soo socodsii haddii aad u baahan tahay ogeysiintan oo ku qoran luqad kale.*

*~ La cusbooneysiiyay 12/18/24 ~*

# ~ Ogeysiinta Asturnaanta HMIS ~

**Macluumaadkaaga iyo Xuquuqdaada**

---

> Waxaad xaq u leedahay in aad gudbiso cabasho haddii aad dareento in aanu ku xadgudubnay xuquuqdaadii ama waajibaadkayaga.

## KANI MA AHA QORAAL DHAMMEYSTIRAN OO KU SAABSAN XUQUUQDA MACLUUMAADKAAGA.

Waxaad fiirin kartaa qoraal dhammeystiran oo ku saabsan xuquuqda macluumaadkaaga. Si aad taasi u sameyso, fadlan qof shaqaale ah ka codso nuqulka *Ogeysiintayada Asturnaanta & Ammaanka ee HMIS*. Waxaad sidoo kale ka fiirin kartaa: https://johs.us/hmis-links-for-providers/hmis-privacy-security-notice/
Haddii aad hayso su'aalo ah ama aad qabto walwal ku saabsan nidaamkayaga xogta iyo sida ay kuu saameyn karto, fadlan ha ka gaabsan in aad la hadasho qof shaqaale ah.

*Fadlan nala soo socodsii haddii aad u baahan tahay ogeysiintan oo ku qoran luqad kale.*